

Ardayda K-12 waxay ku laabanayaan fasallada dhammaan marka laga reebo hal gobol

Maayo 19, 2021

Ardayda ku nool guud ahaan Alberta waxay ku laaban doonaan fasaladooda 25 ka Maayo sida qorshaha yahay, marka laga reebo ardayda ku jirta Maamulka Degmada ee Wood Buffalo.

U wareegida labada usbuuc ee waxbarashada guriga waxay nidaamka waxbarashada siisay waqtii si wax looga qabto caqabada haawlgalka ee ka dhashay kororka kiisaska KOOFID-19 ee gobolka. Ardayda K-12 ee ka tirsan Dawlada Hoose ee Degmada Buffalo waxay sii wadi doonaan inay wax ku bartaan gurigooda toddobaad kale, iyada oo lala beegsan doono ku soo noqoshada shaqsi ah waxbarashada Maayo 31.

"Waan ku faraxsanahay qorshaheena laba toddobaadla ahaa inuu ku guuleystey ku dhowaad dhammaan aagagga gobolka. Qof kastaa wuu shaqeeyey si uu u joojiyo kor u kaca waxaan ku kalsoonahay in dhammaan ardayda ay ku dhammayn doonaan fasalka inta ka dhiman sannad dugsiyeedka. Wuxaan rabaa inaan uga mahadceliyo dhammaan ardayda, waalidiinta, macallimiinta iyo shaqaalaha dadaalkooda iyo dabacsanaantooda maadaama aan ka shaqeyneyno inaan ardayda ka dhigno inay wax bartaan."

Adriana LaGrange, Wasiirka Waxbarashada

Dhammaan iskuulada Dowlada Hoose ee Magaalada Buffalo (mid dowladdeed, mid katoolik ah, mid madax banaan) waa sii wadi doonaa waxbarashada guriga mudo usbuuc dheeri ah. Tirooyinka kiisaska ee gobolkan ayaan hoos ugu dhicin heerka la midka ah gobollada kale, taas oo macnaheedu yahay suuragalnimada sii kordheysa ee sii socoshada howlaha iskuulka.

Nidaamyada adag ee caafimaadka ee ka jira iskuulada way sii socon doonaan, oo ay ku jiraan shuruudaha maaskarada, wada shaqeeynta, baaritaanka astaamaha iyo diyaarinta fadhiga. Taasi waa marka lagu daro ilaalinta ee lagu daray reer Alberta badan oo qaataay tallaalka KOOFID-19, oo ay ku jiraan shaqaalaha dugsiga iyo ardayda da'doodu tahay 12 iyo wixii ka weyn.

Ballaarinta baaritaanka degdegga ah ee dugsiyada ayaa sidoo kale horay ugu socda sidii loogu talagalay Edmonton, Kaalgari (Calgary), Foort Makmori (Fort McMurray), Garand Barari (Grande Prairie) iyo Lasberij (Lethbridge), iyo bulshooyinka kale ee looga baahdo, laga bilaabo usbuuca soo socda. Qeybaha iskuulka ee Edmonton iyo Kaalgari (Calgary) waxaa lasiifyay fursad ay ku helaan baaritaan kooxeed oo laga heli karo xulashada goobaha iskuulka ka hor inta aysan ku laaban waxbarashada shaqsiga ah. Baaritaanka degdegga ah waa lakab kale oo kahortaga faafitaanka COVID-19 iyadoo si dhakhso leh loo aqoonsado dadka aan lahayn calaamado laga yaabo inay qabaan fayraska. Baaritaan kooxeedka degdegga ah ee waxbarashada waxay kala shaqeyn doonaan qaybaha iskuulka xulashada dugsiga ugu dambeeyaa, saadka, nidaamka ogolaanshaha iyo jadwalka.

Ilaa maanta, ilaa 10,800 baaritaan ayaa laga qaaday dugsiyada ([10,800 tests have been conducted](#)) Edmonton iyo Kaalgari (Calgary) taasoo keentay 44 natiijooyin Hordhac ah. Qof kasta oo baaritaankiisa cadeeyey nuu qabo waxaa laga codsanayaa inuu xaqijiyo natiijada isagoo qaadanaya baaritaan shaybaar la xaqijihey oo ku yaal xarunta qiimeynta ee Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS). Natijo wax ku ool ah oo ku saabsan baaritaanka degdegga ah waxay ka dhigan tahay in shaqaalaha ama ardaygu ay u baahan doonaan inay go'doomaan 10 maalmood laga bilaabo taariikhdaas, haddii uusan baaritaanka la socoshada Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS) ahayn.

Xogta la xiriirta

- Waxbarashada K-12 inta lagu jiro KOOFID-19 ([K-12 learning during COVID-19](#))
- Hagitaan iyo talaabooyin caafimaad ee KOOFID-19 oo loogu talagalay iskuulada K-12 ([COVID-19 guidance and health measures for K-12 schools](#))

Warbaahinta Kala duwan

- Daawo shirka warfaafinta ([Watch the news conference](#))

Weydiimaha warbaahinta

[Nicole Sparrow](#)

780-720-1915

Xoghayaha saxaafadda, Waxbarashada

Si aad u hesho ilaha la tarjumay ee dowladda, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>.